



Talo ku socota waalidka marka caruurta dhego-xanuun ku dhaco

Dhego-xanuunka caruurta ku dhaca ee inta badan bakteeriyadu keento, waa caadi oo sida qaalibka ah khatar sidaa u sii ridan ma laha. Caruurta intooda badani, iskood ayay uga bogsadaan dhegoxanuunka noocaas ah oo looma baahdo in la siiyo antibiyootika. Mararka qaarkood se in antibiyootika, siiba penicillin caadi ah, la qaato waa loo baahan karaa. Haddii antibiyootika ilmaha lagu daweyay iyo haddii kalaba, waxaa kale oo loo baahanyahay in la siiyo dawooyinka xanuunka gooya.

Daaweeynta

Waa inaan antibiyootika la siinin caruurta da'doodu u dhaxeeyso gu'jir ilaa 12 jir, haddii aanu haynin dhego-xanuun ba'an oo caabuq leh.

Haddii ilmahaagu uu ka yaryahay hal 1 sano amma uu 12 jir ka weeynahay oo uu qabo dhegoxanuun la hubo oo caabuqay, waxa la siinayaa penicillin. Ilmaha ka yar 2 sanadood, haddii labada dhegoodba xanuunayaan, markaasna waxa la siinayaa penicillin. Waxa kale oo penicillin la siin karaa haddii xuubka dhegta gudaheedu dilaaco. Mararka qaarkood, wuxuu dhakhtarku sameeynkaraa qoritaan dawo oo la qaadankaro uun haddii ilmuhu ku bogsanwaayo maalin ilaa 2 maalmood gudahood. Ama ilmaha antibiyootika ha la siiyo ama yaan la siinin eh, waxa muhiim ah inaad xilkas noqotid oo aad u foajignaatiid haddii xaalada ilmuhu sii xumaato ama uu hore u bogsanwaayo.

Ku noqo dhakhtarka haddii xaaladahan hoos ku qoran ilmaha lagu arko

- Haddii dhegto barar yeelato, ama dhegta halkeda dambe casaato, ama dhegto bananka u soo baxdo.
- Haddii ilmuhu ka sii daro oo uu yeesho xummad badan iyo xanuun, ama uu xanuunku wada saaqo.
- Haddii dhegto dheecaan yeelato (ama adigoo qoraalkii hore ee dhakhtarka ku socday oo ilmaha siiyay antibiyootikadii loo qoray), oo haddana weli ilmuhu uu sii hayo dhego-xanuunkii, ama ay xummadu kaga jabiweeydo 2 ilaa 3 cisho.

Kolba sida loogu baahdo ayaa ilmaha loo siin karaa dawooyinka xanuunka bi'iyaa, sida baaraasitmoosha (paracetamol). Xataa ibuborofiin ayaa la siin karaa, haddii ilmuhu lix bilood ka weeynahay. Waa in ilmuhu xanuunkii ka bogsaday oo xummaddii ka b'aday ugu yaraan maalin ka hor intaanu ku laabanin xannaanada ama dugsiga.

La socodka is-bedelka xaalada ilmaha

Labada degood midkood haddii ilmahaaga ay xanuunayso oo ta kale caafimaadqabto looma baahna dabagal lagu kantroolo, haddii antibiyootiku la siiyay iyo haddii kalaba.

Waa in la kantroolaa caruurta ka yar 4 jir saddex bilood ka dib, haddii labada degegoodba xanuunaan, ama haddii midkood xanuunto ta kalana lagu arko biyo ku jira xuubkeeda gudaha xaggiisa dambe.

Caruurta intaa ka weeyn iyo dadka waaweyn ee labada dhegoodba xanuunaan, waa in la kantroolo saddex bilood ka bacdi hadii wax-maqalku weli sii xunyahay. Waxaad xusuusnaataa in maqalku sii liidankaro dhawrka todobaad ee ka dambeeya markuu qof dhego-xanuun ku dhaco.

Ku noqo dhakhtarka si baadhis cusub loo sameeyo, haddii aad isku aragtid astaamo kale: sida dhegtoo ku xanuunta, ku oowdanta, cadaadis fuulo, ama yeelata dheecaan ama saameeyn ku yeelata dheelitirkaaga.

Ilmaha dhakhtar u gee mar walba oo aad tuhantid inaanu ilmahaagu si fiican wax u maqleeynin, haddii dhego-xanuun aad ku aragtay iyo haddii kalaba.

**Calaamadee meesha ku haboon tilmaamidda
xaaladada halka ilmaha laga hayo markaad
ilmaha dhakhtarka geysid:**

Maanta Ilmaha dhego-xanuun baa haya

- Dhegta bidix
- Dhegta midig
- Dhegta kale way fayawdahay
- Dhegta kale qoyaan bay leedahay
- Kontrool looma baahna haddii wax walba fiicanyihiin.
- Waxa lagu talinayaa in kontrool loo soo noqdo 3 bilood ka dib.

ILMAHA MAR HORE AYAA DHAKHTARKA LA KEENAY

TAARIKHDA MAALINTII LA KEENAY

LA XIDHIIDHA/BALLAN IGA DHIGA

TELIFOON



Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

Solna Nobels väg 18, SE-171 82 Solna Östersund Forskarens väg 3, SE-831 40 Östersund.
www.folkhalsomyndigheten.se